SO

“Waxaan ku jiraa nidmaaka dublin – maxaa loola jeedaa?”

B

Nidaamka dublin- warbixinta codsadayaasha magangalyada caalamiga sida uu qabo qodabka 4 ee xeerka (eu) Lambarkiisu yahay 604/2013

Warqaddan waxaa laguu siiyay magangalyadan caalamiga ah eed codsatay darteed eed ka codsatay wadankan ama wadan kale oo Dublin katirsan maamuladuna xaq bay u leeyihiin inay aaminaan in laga yaabo in wadan kale uu masuul kayahay baadhista codsigaaga.

Waxaan go'aansan doonaa wadanka masuulka ka ah anagoo marayna nidaamka sharciga Midowga Yurub ee loo yaqaano Xeerka 'Dublin' habkan waxaa la dhahaa 'Nidaamka Dublin'. Warqaddan waxay ka jawaabaysaa su'aalaha aadka usoo noqnoqda ee laga yaabo inaaad ka qabi karto nidaamkan.

Haddii ay jiraan wax halkan ku qoran oo aadan fahmin, fadlan waydii maamulka.

Warqadan waxaa loogu talagalay warbixin kali ah. Hadafka laga leeyahay waa in la siiyo dalbadayaasha raadinaya magangalyada caalamiga ah warbixin ku haboon sida uu qabo nidaamka Dublin. Iyadu ma abuurayso/keenayso xuquuq ama waajibaad sharci ah. Xuquuqaha iyo waajibaadka Gobalka iyo shakhsigaba waxaa cadeeyay nidaamka Dublin waxaana lagu dajiyay Xeerka (EU) Lambarkiisu yahay 604/2013.

©Midowga Yurub 2014
Dib usoosaaridda waa la ogalyahay. Wixii isticmaalid ah ama dib usoo saarid sawirada shakhsiga ah, waa in ogalaansho laga dalbadaa cidda tooska u leh xuquuqda daabacaadda.



Wadamada Dublin waxaa ku jira 28ka wadan ee Midowga Yurub Ayrlandi (IE), Biljam (BE), Bolaandi (PL), Bulgeriya (BG), Danmarki (DK), Faransa (FR), Fiilaan (FI), Giriig (EL), Hangari (HU), Isbayn (ES), Isloofaakiya (SK), Isloofeeniya (SI), Istooniya (EE), Iswiidhan (SE), Jarnani (DE), Jeeg Ribablik (CZ), Karooshiya (HR), Khubras (CY), Laadfiya (LV), Laxanbargi (LX), Litu'aaniya (LT), Malta (MT), Nedarlandi (NL), Ostariya (AT), Purtaqiis (PT), Roomaaniya (RO), Talyaani (IT), Yunaytidh Kiingidhoom (UK), iyo sidoo kale 4ta wadan ee la « xiriirta » Xeerka Dublin Noorwey (NO), Ayslaandhi (IS), Iswiisarlaandhi (CH), iyo Lijtenistiin (LI).

“Maxaan u marayaa nidaamka Dublin?”

Ayrlandi (IE), Biljam (BE), Bolaandi (PL), Bulgeriya (BG), Danmarki (DK), Faransa (FR), Fiilaan (FI), Giriig (EL), Hangari (HU), Isbayn (ES), Isloofaakiya (SK), Isloofeeniya (SI), Istooniya (EE), Iswiidhan (SE), Jarnani (DE), Jeeg Ribablik (CZ), Karooshiya (HR), Khubras (CY), Laadfiya (LV), Laxanbargi (LX), Litu’aaniya (LT), Malta (MT), Nedarlandi (NL), Ostariya (AT), Purtaqiis (PT), Roomaaniya (RO), Talyaani (IT), Yunaytidh Kiingidhoom (UK), iyo sidoo kale 4ta wadan ee la « xiriirta » Xeerka Dublin Noorwey (NO), Ayslaandhi (IS), Iswiisarlaandhi (CH), iyo Lijtenistiin (LI).

Nidaamka Dublin wuxuu ku salaysanyahay in hal wadan uu masuul kayahay baadhista codsigaaga magangalyo. Tan macnaheedu waxaa weeye waxaa lagaa wareejin karaa wadankan oo waxaa laguu wareejin karaa wadan kale kaasoo masuul ka ah baadhista codsigaaga.

Nidmaaka Dublin wuxuu leeyahay labo ujeeddo:

- in la damaanad qaado in codsigaaga magangalyo uu gaaro maamulka wadanka masuulka ka ah baadhitaankiisa;
- in la xaqiijiyo inaadan wadamo badan codsi magangalo ka xaraysan iyadoo ay ujeedadaadu tahay inaad kordhisatid joogitaankaaga wadamada Dublin.

Ilaa laga go’aansanayo wadanka masuulk ka ah go’aan ka gaadhista codsigaaga, maamulka halkan ma tixigalin doono macluumaadka codsigaaga.

XASUUSNOW: Lama ogala inaad u kacdo wadan kale oo Dublin katirsan. Haddii aad u kacdo wadan kale oo Dublin katirsan, waxaa dib laguugu soo celinayaa halkan ama wadankii aad horey magangalyada u waydiisatay. Inaad iska dhaafto codsigaagii halkan ma badali doonto wadanka masuulka ka ah. Haddii aad dhuumato ama aad baxsato, waxaad khatar ugu jirtaa in lagu xiro.

Haddii wakhti lasoo dhaaftay aad joogtay wadan katirsan Dublin oo aad markaas ka tagtay gobalka wadamada Dublin ka hor inta aadan imaan wadankan, waxaa waajib ah inaad noo sheegto. Tani waa muhiim maxaa yeelay waxay saamayn kartaa wadanka masuulka ka ah inuu baadho codsigaaga. Waxaa lagu waydiin karaa inaad keento caddeyn ah wakhtigii aad ku qaadatay meel ka baxsan

©European Union

wadamada Dublin, tusaale ahaan shaambad ku taala baasaboorkaaga, go'aanka celinta ama ka saarid, ama warqado rasmi ah oo tusaya inaad ku noolayd ama aad ka shaqaynaysay meel ka baxsan wadamada Dublin.

“Warbixintee bay tahay inaan xaqiijyo in maamulku ogaadaan? Sideen warbixintan ugu sharixi karaa maamulka?”

Waxay u badantahay in lagu waraysto si loo go’aansado wadanka masuuka ka ah baadhista codsigaaga magangalyo. Waraysigan, waxaan ku sharixi doonaa ‘nidaamka Dublin’. Waa inaad na siisaa dhamaan warbixinta ku saabsan joogitaanka xubin qoyskaaga ka mid ah uu joogo wadamada Dublin, iyo sidoo kale warbixin kasta oo kale taasood u malaynayso inay gacan ka gaysanayso ogaanshaha wadanka masuulka ka ah (hoos ka fiiri tilmaamo faahfaahsan oo ku saabsan nooca warbixinta xiriirka la leh). Sidoo kale waa inaad keentaa wixii dukumintiyo ah ama waraaqo ah oo aad hayso toosoy ku jirto xog la xiriirta arintan.

Fadlan noo sheeg warbixnta la xiriirta si ay u caawiso wadanka masuulka ka ah baadhista codsigaaga.

Waraysiga waxaa lagaaga qaadayaa luuqad aad taqaano ama loo tixgaliyo inaad si macquul ah u fahmi karto oo aad awooddo inaad dadka kula hadasho.

Waxaad waydiisan kartaa turjumaan kaa caawiya luuqadda haddii aadan aoowdin inaad fahanto luuqadda la isticmaalayo. Turjumaanku waa inuu kaliya turjumaa waxa adiga iyo qofka waraysiga qaadaya aad is leedihiin. Turjumaanku waa inuusan ku darin fikradiisa ama aragtidiisa shakhsiyeed. Hadddii ay kugu adkaato fahanka turjumaanka, waa inaad noo sheegtaa, ama aad la hadashaa qareenkaaga.

Waraysigu wuxuu noqon doonaa mid sirtaada laguu qariyo. Tan macnaheedu waxaa weeye wax kamid ah warbixinta aad bixisay, oo ay ku jirto warbixinta kusaabsan inaad magangalyo codsatay, looma diri doono dad ama saraakiisha maamulka wadanka aad asal ahaan kasoo jeeddo, kuwaasoo si un ku waxyeelayn kara adiga ama xubnaha qoyskaaga ee wali jooga wadanka aad asal ahaan kasoo jeeddo.

Waxaa kaliya oo laguu diidi karaa xaqqa aad u leedahay waraysiga haddii aad warbxintan horey u bixisay adoo isticmaalay qaab kale, kadib markii laguu sheegay wax kusaabsan nidmaaka Dublin iyo saamaynta ay ku yeelanayso xaaladaada. Haddii aan lagu waraysan, waxaad waydiisan kartaa inaad bixisid warbixin dheeri ah oo qoran taasoo la xiriirta go’aan ka gaadhista wadanka masuulka ka noqonaya.

“Sidee bay maamulku ku oganaayaan wadanka masuulka ka ah baadhista codsigayga? “

Waxaa jira sababo badan oo uu wadan masuul uga noqon karo baadhista codsigaaga. Su’aalaha ayaana la dabakhayaa iyadoo loo eegayo qaabka uu sahrcigu muhiimadda u siinayo. Haddii hal sabab ay ku haboonaan waydo, tan ku xigta ayaa la tixgalin doonaa, iyo wixii ka sii danbeeya.

Sababaha la xiriira qodabada soo socda, oo isugu xiga qaabka ay u kala muhiimsanyihiin:

- waxaa jira xubin qoyskaaaga ka mid ah (ninkaaga, xaaskaaga, caruurtaada da’doodu ka hoosayso 18) kuwaasoo la siiyay magangalyo caalami ah ama kuwaasoo magangalyo doon ka ah wadan kale oo Dublin katirsan;
  Sidaa darteed waa mhiim inaad noo sheegto haddii ay jiraan xubno qoyskaaga kamid ah oo jooga wadan kale oo Dulin katirsan, ka hor inta aan lasoo saarin go’aanka koobaad ee codsigaaga magangalyo. Haddii aad rabto in la iskugu kiin keeno isla halkaa waddan, adiga iyo xubinkaas qoyskaaga ka mid ah waa inaad rabitaankiina qoraal ahaan ku caddeysaan.
- Haddii horey la idinkugu soo saaray fiise ama ogalaansho daganaansho wadan kale oo Dubin katirsan;
- Haddii faraha la idinkaga qaaday wadan kale oo Dublin katirsan (oo lagu kaydiyay kaydka xogta ee Yurub ee la dhaho Eurodac [1]);
- Haddii ay jirto caddeyn ah inaad joogi jirtay, ama aad safar ku tagtay, wadan kale o Dulin katirsan, xittaa haddii aan halkaas faraha lagaaga qaadin.

1) **Faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan Eurodac waxaa lagu bixiyay bogga 8 ee warqadda “waxaan magangalyo waydiistay EU – wadankee maarayn doona sheegashadayda?**

“Kawaran haddaan ku tiirsanahay qof kale ama uu qof kale igu tiirsanyahay? “

Waxaa la iskugu kiin gayn karaa isla halkii waddan haddii **hooyadaa, aabahaa, ilmahaaga, walaalkaa ama walaashaa** ay waafaqaan shuruudaha soo socda:

- Haddii ay si sharci ah ku daganyihiin mid kamid ah wadamada Dublin;
- Haddii midkiin uu uur leeyahay, ama uu leeyahay ilma mar dhow dhashay, ama uu si daran u xanuunsanayahay, ama uu leeyahay naafo khatar ah, ama uu yahay qof duq ah;
- Haddii midkiin uu ku tiirsan yahay caawinta qof kale, kaasoo awoodo inuu daryeelo.

Wadanka uu ilmahaaagu, walaalaha, ama waalidkaa daganyahay ayaa masuul ka noqon doona baadhista codsigaaga, iyadoo lala xiriirinayo waxaad isugu ahaydeen wadankiinii asalka. Sidoo kale waxaa lagu waydiin doonaa inaad qoraal ahaan ku sheegto inaad labadiinuba rabtaan in dib la iskugu kiin keeno.

Sidan waad waydiisan kartaa haddii aad horey u joogtay wadanka uu ilmahaagu, walaalahaa, ama waalidkaa joogo, ama haddii aad joogto wadan ka duwan kan ay qaraabadaadu dagantahay. Arintan labaad, waxaa loola jeedaa waxaad aadi doontaa wadankaas, ilaa aad qabto xaalad caafimaad oo kaa hor istaagaysa inaad safar gasho wakhti dheer.

Arintan waxaa sii dheer, waxaad markasta waydiisan kartaa inta lagu jiro nidaamka magangalyada, inaad kubiirto qoys aad xiriir u leedihiiin binii aadamtiniomo, qoys ahaan ama dhaqan ahaan. Haddii tan la aqbalo, waxaad u guuri kartaa wadanka ay joogaan cidda ay qoyskaaga wax wadaagaan. Xaaladda noocan ah waxaa sidoo kale lagu waydiin doonaa inaad ogalaanshahaaga qoraal ahaan ku bixisid. Waa muhiim inaad na soo ogaysiiso, wixii sababo binii’aadantinimo la xiriira oo codsigaaga halkan loogu baadhayo ama wadan kale loogu baadhayo.

Marka ay yimaadaan arimo la xiriira wax isu ahaansho, ku tiirsanaansho ama binii’aadantinimo, waxaa lagu waydiin karaa inaad keento sharaxaad ama caddeyn aad ku xoojinayso waxa aad sheeganayso.

“Kawaran haddaan xanuunsanahay ama aan qabo baahiyo khaas ah? ”

Si laguu siiyo daryeelka caafimaad ama daawaynta kugu haboon, maamulka halkan waxay u baahanyihiin inay ogaadaan wixii baahiyo khaas ah ee aad qabto, oo ay ku jirto warbixinta caafimaadkaaga, iyo khaas ahaan haddii:

- aad tahay qof naafo ah,
- aad uur leedahay,
- aad qabto jirro khatar ah,
- laguu gaystay jirdil, kufsi, ama waxyeelo kale oo maskax ahaan, jir ahaan iyo galmo ahaan ah oo khatar ah.

Haddii aad noo sheegto macluumaadka caafimaadkaaga oo la go’aansado in laguu diro wadan kale, waxaan ku waydiisan doonaa ogalaanshahaaga inaan warbixintaada caafimaad la waddagno wadanka laguu dirayo. Haddaad tan ogalaan waydo, waxay hor istaagaysaa in la diro warbixintaada caafimaad laakiin ma joojinayso in laguu wareejiyo wadanka masuulka ka ah arintaada. Xasuusnow in haddii aad ogalaan waydo inaan warbixintaada caafimaad u dirno wadanka kale, wadankaas ma awoodi doono inuu ka taxadaro baahiyahaaga khaaska ah.

Fadlan xasuusnow warbixntaada caafimaad waxaa loo ilaalin doonaa sida ugu saraysa ee sir ahaaneed waxaana ilaalin doonta khubaro aad ugu xeel dheer waajibaadka siraha.

“Ilaa intee ayay qaadan doontaa in la go’aansado wadanka ku shaqada leh codsigayga? Ilaa intee ayay qaadan doontaa ka hor intaan codsigayga labaadhin?“

Haddii maamulka wadankan ay go’aansadaan inaan masuul kanahay baadhista codsigaaga magangalyo, tan macnaheedu waxaa weeye waxaad joogi kartaa wadankan codsigaagana waxaa lagu baadhayaa halkan.

“Maxaa dhacaya haddii wadan kale, oo ka duwan kan aan hadda joogo, la ogaado inuu masuul kayahay baadhista codsigayga? “

Haddii ay nala noqoto in wadan kale uu masuul kayahay baadhista codsigaaga, waxaan waydiisan doonaa wadankas inuu ku aqbalo masuuuliyadda **3 bilood** gudahood oo ka bilaabata taariikhda aad codsigaaga u gudbisay wadankan.

Si kastase ha ahaatee, haddii masuuliyadda wadanka kale lagu ogaado xogta faraha ee lagaa qaaday, codsiga wadanka kale loo dirayo waxaa lagu diri doonaa **2 bilood** gudahood oo ka bilaabmata wakhtiga natiijada laga helay Eurodac.

- *Haddii markan uu yahay markii ugu horeysay eed maganglyo ka dalbato wadan katirsan Dublin laakiin ay jirto sababo kale oo loo aamino karo in wadan kale oo Dublin katirsan ay tahay inuu baadho codsigaaga magangalyo, waxaan ka codsan doonaa wadankaas kale inuu **“u howl galo”** kiiskaaga.*

Wadanka aan codsiga u dirnay waa inuu kusoo jawabaaa **2 bilood** gudahood oo kabilaabmata wakhtiga la helo codsiga. Haddii wadankaas uu kusoo jawaabi waayo wakhtiga loogu talagalay, tan macnaheedu waxaa weeye wuxuu aqbalay masuuliyadda codsigaaga.

- *Haddii aad horey magangalyo uga dalbatay wadan kale oo katirsan Dublin kaasoo ka duwan kaad hadda joogtid, waxaan ka codsan doonaa wadankaas kale inuu **“dib kuu celiyo”***

Wadanka aan u dirnay codsiga waa inuu kusoo jawaabaa **1 bil** gudaheed oo ka bilaabmata wakhtiga la helo codsiga ama **2 asbuuc** gudahood haddii codsigu uu ku salaysnaa xogta Eurodac. Haddii wadankaas uu kusoo jawaabi waayo wakhtigan loogu talagalay, tan macnaheedu waxaa weeye wuxuu aqbalay masuuliyadda codsigaaga wuxuuna ogalaaday inuu dib kuu celiyo.

Haddii, sikastaba ha ahaatee, aadan magangalyo ka dalban wadankan oo magangalyadaadii hore ee wadanka kalana lagu diiday go’aan kama danbaysa ah, waxaan dooran karnaa inaan codsi u dirno wadanka masuulka ka ah si ay dib

kuugu celiyaan, ama la sii wado sidii laguugu celin lahaa wadankii aad asal ahaan kasoo jeeday, ama dagnaaansho joogto ah lagu siiyo ama in lagugu badbaadiyo waddan sadexaad.

Haddii uu wadan kale aqbalo inuu masuul kayahay baadhista codsigaaga, waxa laguu soo sheegi doonaa go'aankayaga:

- inaan lagu baadhin codsigaaga magangalyo wadankan iyo,
- in laguu wareejiyo wadanka masuulka ka ah.

Wareejintaadu waxay ku dhacaysaa 6 bilood gudaheed oo ka bilaabmata taariikhda marka wadanka kale uu aqbalay masuuliyadda, ama, haddii aad go'aansato inaad ka dooddo go'aanka,6 bilood gudahood oo ka bilaabmata marka maxkamad ama xeerbeegtu ay go'aansadaan in laguu diro wadankaas. Xadidaadan wakhtiga waa la korhdin karaa hadaad ka baxsato maamulka halkan ama haddii lagu xidho.

Haddii lagu galiyo meelaha la isku xidho/xarun xidhan, oo wadankan ah iyadoo qayb ka ah nidaamka Dublin. Xadidaadda wakhtiyo gaaban ayaa ku dabakhmi doona (wixii warbixin dheeri ah ka fiiri qaybta khaaska u ah xidhitaanka).

Wadanka masuulka ka ah wuxuu kuula dhaqmi doonaa sidii magangalyo doon waxaadna ka faa'iidaysan doontaa dhamaan xuquuqaha la xiriira. Hadaadan waligaa horey uga dalban magangalyo wadankaas, waxaa lagu siin doonaa fursad aad ku dalbato markaad tagto kadib.

“Kawaran haddaan kasoo horjeesto go’aanka ah in wadan kale la ii diro? ”

Waxaa macquul ah inaad dhahdo waan kasoo horjeedaa go’aanka laguugu dirayo wadan kale oo Dublin katrisan. Tan waxaa la dhahaa ‘racfaan’ ama ‘dib u eegis’. Waxaad sidoo kale waydiisan kartaa in la joojiyo wareejinta mudada uu socdo racfaanku ama dib u eegistu.

Waxaad heli kartaa warbixinta maamulka lala xiriirayo dhamaadka warqaddan si aad uga dooddo go’aanka wadankan.

Marka aad ka hesho go’aanka rasmiga ah ee wareejinta ee hay’adaha, waxaad haysataa 21 maalmood oo aad rafcaan ugu samayn karto Maxkamadda Maamulka. Aad bay muhiim u tahay inaad uga dooddo (racfaanka ama dib u eegista) wakhtiga loogu talagalay.

Waxaad haysaa toddoba (7) maalmood inaad codsato in wareejintaada la hakiyo inta rafcaankaaga la baadhayo. Maxkamad ama xeer beeg ayaa wakhti yar go’aan uga gaari doona codsigan. Haddii ay kuu diiddo in la joojiyo, waxaa laguu sheegi doonaa sababaha ay taasi ku dhacday.

Inta lagu guda jiro nidaamkan waxaad xaq u leedahay caawin sharci iyo, caawin luuqadeed haddey muhiiim noqoto. Caawin sharci waxaa loola jeedaa waxaad xaq u leedahay inaad hesho qareen kaasoo kuu diyaarin doona waraaqahaaga oo maxkamadda horteeda kaa matali doona.

Waxaad wadyiisan kartaa inaad caawintan kuhesho lacag la’aan haddii aadan kharashaadka ka bixi karin. Warbixinta ururada bixiya caawinta sharci waxaa laga heli karaa dhamaadka warqaddan.

“Ma la I xidhi karaa?“

Waxaa jira sababo kale oo laguu xidhi karo, laakiin, markay noqoto nidaamka Dublin, waxaa kaliyoo laguu xidhi karaa haddii maamulku ay la noqoto inay jirto khatarta macquulka ah ee laga yaabo inaad baxsato iyadoo ay sababtu tahay inaadan rabin in laguu diro wadan kale oo Dublin katirsan.

©iStockphoto / Joe Gough

“Tan maxaa loola jeedaa?“

Haddii maamulkayaga ay la noqoto inay jirto khatar macquul ah oo ah inaad naga baxsato – tusaale ahaan inaad saas horey u samaysay ama sababtoo ah inaadan u hogaansamin waajibaadka warbixinta iwm. – waxay ku dhigi karaan meelaha la isku xidho wakhti kasta inta lagu jiro nidmaaka Dublin. Sababaha laga yaabo in lagugu xidho waxaa qoraya sharciga. Ma jirto sabab kale oon kuwaas ka ahayn oo la cuskan karo si lagu xidho.

Waxaad xaq u leedahay in qoraal ahaan laguugu soo sheego sababaha laguu xidhay, iyo sidoo kale macquul galnimada inaad ka doodi karto amarka xidhigga. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay caawin sharci haddii aad rabto inaad ka dooddo amarka xadhigga.

Haddii lagu xidho inta lagu guda jiro nidaamka Dublin, wakhtiyada nidaamka eed leedahay waa sidan soo socda:

- Waxaan ka codsan doonaa wadanka kale inuu ku aqbalo masuuliyadda **1 bil** gudaheed oo ka bilaabmata gudbinta codsigaaga magangalyo.
- Wadanka aan codsiga u dirnay waa in uu kusoo jawaabaa **2 asbuuc** gudahood oo ka bilaabmata helitaanka codsigayaga.
- Wareejintaada waa in lagu fulyaa **6 asbuuc** gudahood oo ka bilaabmata wakhtiga aqbaaladda codsiga ee wadanka masuulka ka ah. Haddii aad dood ka qabto go’aanka wareejinta, 6da asbuuc waxaa laga tirinayaa wakhtiga maamulku, ama maxkamaddu ama xeerbeegtu go’aansato inay adiga ammaan kuu tahay in laguu diro wadanka masuulka ka ah marka racfaankaaga la tixgaliyo.

Haddaan ku guuldaraysano inaan u hogaansano inaan wakhtiga kamadanbaysta ah ee dirista codsiga ama ama hirgalinta wareejintaada, xidhitaankaaga looga danleeyahay wareejinta sida uu qabo Xeerka Dublin way dhamaan doontaa. Arinta nocaas ah, xadidaadaha caadiga ah ee wakhtiga ee kor lagu xusay ayaa ku dabakhmi doonta.

“Maxaa ku dhici doona warbixinta shakhsiyeed een bixiyo? Sideen ku ogaan doonaa inaan si khaldan loo isticmaalin?“

Maamuldda wadamadaa Dublin waxay is waydaarsan karaan xogta aad iyaga siiso inta lagu guda jiro nidaamkaas Dublin iyadoo ay ujeedadu tahay gudashada waajibaadkooda sida ay qabaan Xeerarka Dublin iyo Eurodac. Inta uu socdo nidaamka Dublin oo dhan waxaad xaq u leedahay in macluumaadka warbixintaada shakhsiyeed oo dhan iyo warbixinada aad bixiso ee ku saabsan naftaada, xaaladda qoyskaaga, iwm. in la ilaaliyo. Xogtaada waxaa kali ah oo loo siticmaali karaa ujeedada uu sharci cadeeyay.

Waxaad xaq u yeelan doontaa galaangalka:

- Xotgta adiga kula xiriirta. Waxaad xaq u leedahay inaad codsato xogta noocaas ah, taas oo ay ku jirto in la saxo xogta Eurodac, haddii aysan saxsanayn, ama in la tirtiro haddii si aan sharci ahayn loo baroosees gareeyay;
- Warbixinta sharaxasysa sida loo waydiisto in xogtaada, oo ay ku jirto xogta Eurodac, loo saxo ama loo tirtiro. Tan waxaa ku jirta macluumaadka meesha lagala xiriirayo maamulka masuulka ka ah barooseeskaaga nidaamka Dublin, iyo maamulka qaranka ee ilaalinta xogta ee maskuulka ka ah la macaamilka codsiyada khuseeya ilaalinta xogta shakhsiyeed.

1.9.2016 somali